

Baaritaanka qaaxada (TB) markii yimaado Norway.

Qof walba oo u yimaada Norway sida magangalyo doon ama qaxooti waa in laga tijaabiyaa qaaxada (TB). Muhaajiriinta kale waxay u baahan yihiin baaritaan haddii ay ka yimaadeen wadan ay ka jirto qaaxadu. Baaritaanka wuxuu ka kooban yahay Raajada sambabada (raajada xabadka), iyo baaritaanka dhiigga ah ama baaritaanka maqaarka.


Raajada Xabadka:

Raajada xabadku waxay qaadataa kaliya dhowr daqiiqo isla markaana kuma waxyeeleyneyso. Haysashada raajada xabadku waa badbaado, xitaa haddii aad uur leedahay. Si aad u heshid sawirka raajo wanaagsan, adiga ayay kuu wanaagsan tahay in aad iska saartid dharkaaga kore oo dhan. Haddii aad jeceshahay, waxaa laga yaabaa garan qafiif ah oo aan galuuso laheyn ama qurxin. Rajabeetada sidoo kale waa in la bixiyaa iyada oo Raajada la qaadayo, waxaad u baahaneysaa in aad gudaha u neefsato iyo celisid neeftaada.




Dadka qaarkii waxaa sidoo kale laga qaadayaa baaritaanka dhiiga ama baaritaanka maqaarka.

Baaritaanka dhiigga (IGRA):



Baaritaanka maqaarka (Mantoux):



Si dhakhso leh uma heleysid natiijooyinka baaritaanada markaas iyada ah. Waxay qaadataa dhoor maalmood. Baaritaanka waxaa laga yaabaa in uu tilmaamo in aad u baahantahay baaritaan dheeraad ah ama aad u baahantahay in aad la hadashid dhaqtar. Arintaas darteed, waa lagula soo xiriirayaa. Taana micnaheeda khasab maahan in aad la xanuunsan tahay cudurka qaaxo.

Astaamaha qaaxada waxaa ku jira qufac daba dheeraada (oo soconaya saddex asbuuc ama ka badan), qandho, culeys yaraasho, taba rdarro iyo daal, dhidid habeenkii ah ama barar ama buro qoorta ka soo baxdo, gumaarkaaga ama gacmahaaga hoostooda. Waxaad ku qabi kartaa jeermiska qaaxda jirkaaga iyada oo aan noqon jiro cudurka ah. Kaliya qaaxada oo aan la daaweyn ee sambabada (qaaxada sambadabada) waxay saameysaa dadka kale.

Haddii aad qabtid qaaxo, waxaa si bilaash ah lagaaga daaweynayaa Norway. Waxaad xaq u yeelanaysaa in aad joogtid Norway ilaa aad dhameystirto daaweynta.

Xasuuso in qaaxada la daawweyn karo! Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan qaaxada, booqo www.fhi.no